SIDAAS DARTEED LIBRAALIYIIN

Waa inaad u noolaataa sidaad doonayso, adigu isu taliso, haysato riyooyin gaar kuu ah oo awoodo inaad shaqaysato si ay tani u noqoto xaqiiq. Waa xorriyad, waana waxa fikradda libraaliyadda ay ku saabsantahay.

WAXA LAGU YAQAANO LIBRAALIYADA

Libraaliyada micnaheedu waa xorriyad. Laakiin lama mid aha in dadka oo dhan sameeyaan sida ay doonayaan. Haddii xorriyadu khuseyso dadka oo dhan – oo aan ahayn oo keliya qofka weyn ee ugu xoog weyn – waxaynu u baahanahay qawaaniin wada-jir ah. Waa sidaas darteed waxa aynu u haysano tusaale ahaan xorriyada cabbirka fikrada, waajibka iskool tegista iyo booliis, oo aynu isu caawino in la shaqeeyo oo si wada-jir ah loo bixiyo daryeelka iyo nabad geliyada. Fikradaha lagu yaqaano libraaliyada!

DIGNIINTA LIBRAALIYADA KU JIRTA

Fikradaha libraaliyada waxay weligood ka caraysiin jireen kuwa doonaya inay wax hogaamiyaan oo xukumaan. Ka soo hor jeedayaasha xorriyada siyaabo kala duwan ayay u soo eekaayeen taariikhda: boqorro iyo dadka dabaqada sare oo ay ku xigeen naatsiyiinta iyo shuuciyiinta. Maantana waa beer laxoowsadayaasha iyo xag-jiriinta. Dunida oo dhan iyo gudaha Iswiidhan waxay soo baxaan iyagoo wata nacaybka ay u hayaan dimoqraadiyada, aqoonta iyo kala duwanaanshaha dadka. Iminka waa xilligi la diidi lahaa. U codee nuxur libraaliyad dheeraad ah oo ku jira siyaasada.

ARRIMAHAYAGA UGU MUHIIMSAN



Marka iskoolku aanu shaqaynayn, ardaydu aanay helin inay bartaan waxay u baahanyihiin – markaasi waxaa yaraata xorriyada in la abuuro nolol gaar u ah. Marka is dhex galka dadka lagu guul daraysto, farqiga dabaqaduhu kordho – markaasi waxaa laga hor joogsadaa dadka inay is dabari karaan. Sidaas darteed iskoolka iyo is dhex galka dadka waa arrimaha ugu muhiimsan Libraaliyiinta dhinaca doorashada 2018.

Waxaanu ahmiyada kowaad siinaa iskoolka, waayo waxbarashadu waxay keentaa fursado iyo xorriyad. Fasalku waa inuu ahaado meel loogu talogalay aqoonta, deganaansho iyo xasilooni shaqo.

Waxaanu doonaynaa Iswiidhan isku duuban, taas oo iswiidhishka cusub ay keligood is masruufi karaan oo ay ka mid ahaan karaan inay wax soo kordhiyaan. Luqada, shaqo iyo sinnaanta haweenka iyo ragga waa jidka loo maro soo dhex galka bulshada.

Jan Björklund. Libraaliyiinta hogaamiyahooda xisbi. 56 jir ah, ku nool Bromma isaga iyo xaaskiisa iyo labadiisa wiil. Wuxuu soo ahaa wasiirka waxbarashada oo fikradiisu waa in wax waliba ka bilaabmaan iskool fiican.

Dawlad. Libraaliyiintu waxay doonayaan inay dawlad cusub si wada-jir ah ula dhisaan xisbiyada kale ee ku jira Isbahaysiga. M, C iyo KD. Libraaliyiintu ma ka mid ahaan doonaan dawlad siisa Sverigedemokraterna inay saamayn ku yeeshaan dawlada siyaasadeeda.

Waa inaga kuwa ah Libraaliyiinta. Ka hor wuxuu magacayagu ahaa Folkpartiet. Xisbigan waxaa la dhisay 1934, haddana 2015 ayaanu go'aansanay in si fudud magacayagu u ahaado waxaanu nahay – Libraaliyiinta.

DIGNIIN! Nuxur libraaliyad ah. Waxay karhi kara beer-laxowyaasha caadifada kiciya, xag-jirka iyo hanti-wadaaga. Xaqiiqda iyo bini'aadnimadu waxay si halis ah u dhaawici karaan cuqdada iyo beer-laxowsiga caadifada kiciya.

liberalerna.se / info@liberalerna.se / 020-53 53 53

Liberalerna

ISKOOLKA AYAA UGU HOREEYA

Gudaha iskoolkana waa in dhalin kastaaba ogaado in wax kastaaba yihiin suurtagal. Laakiin maanta hal ka mid ah toddobadii ardayba waxay dugsiga aasaasiga ah ka tagaan iyagoo aan haysan aqoon ku filan si ay u awoodaan bilaabida dugsiga sare. Fasaladu badanaaba waa kuwo dhib iyo buuq leh. Waxaa ku yar macalimiinta. Kuwii u baahnaa deganaansho iyo xasilooni ma awoodaan inay xooga saaraan shaqadooda, iyo in kuwii awoodi lahaa inay hore u sii socdaan ay helaan dhiiri gelin aad u yar. Sidaasi ma ku sii socon karno.

Wakhti dheeraad ah iyo aqoon dhab ah. Ma jiro jid gaaban oo loo maro aqoonta: waxaa loo baahanyahay wakhti iyo macalimiin xarfaan ah. Waxaanu doonaynaa in la helo waxbarasho macalimiin hogaamiyaan oo dheeraad ah iyo saacado cashar oo dheeraad ah. Iskoolka waa inuu toban sano u ahaado dadka oo dhan oo qofkii u baahan wakhti dheeraad ah waa inuu taas helo.

Deganaansho iyo xasilooni ka jirta dhamaan fasalada. Dhibaatada fasalka oo yaraata waxaa wanaag ku dareema ardayda iyo macalimiinta labadaba. Taageero xilli hore ah, macalimiin takhasus ah oo dheeraad ah iyo kooxaha wax la barayo oo yar looguna talogalay kuwa u baahan. Dhamaan fasaladu waa inay ahaadaan kuwo ah bilaa moobil.

Taageera macalimiinta. Xirfada macalinimo waa ta ugu muhiimsan aduunka – ha kordhaan mushaarooyinka iyo qiimahoodu oo ha la fiicnaysiiyo shuruudaha shaqo. Shaqooyin waayo aragnimo shaqo oo badan iyo fursadaha in la horumaro. Waxbarasho sii fiican wadatana macalinimo dheeraad ah, hogaamin iyo wax qabad toos ah.

IS DHEX GALKA DADKA OO SII FIICNAADA

Soo galootiga ajnabiga waxay Iswiidhan ka dhigtay mid sii fiican, sii caqli badan oo qani ah wakhtiyadi la soo dhaafay. Laakiin maanta waxaynu aragnaa dhibaatooyin waaweyn dhinaca dad bulshadi banaanka ka jooga, shaqo la'aan iyo amaan la'aan ka jirta xaafadaha duleedka magaalooyinka waaweyn iyo xaafadaha dhibaataysan. Dad badan ma helaan fursada ah inay u noolaadaan si madax banaan. Iswiidhishka cusub waa inay awoodaan inay is masruufi karaan oo ay ka mid ahaan karaan inay wax soo kordhiyaan.

Luqada iyo shaqada. Luqadu waa tigidhka lagu soo galayo bulshada iswiidhan, xorriyada iyo madax banaanida shakhsiga. Waxaanu doonaynaa in shuruudo cad lagu xiro in si dhakhso ah loo barto iswiidhishka. Shaqo soo gelid ah oo mushaaradeedu hooseyso iyo qawaaniin fudud waxay keenaan in dad badan ay heli karaan shaqadoodi ugu horeysay.

Sinnaan loogu talogalay dadka oo dhan. Xorriyad iyo xuquuq isku mid ah oo loogu talogalay haweenka oo dhan. La dagaalanka cadaadiska ku salaysan sharafta iyadoo loo marayo aqoonta oo la kordhiyo, sharci dejin cad iyo ciqaab adag. Xag-jiriinta diineed iyo booliiska caqiidadu wax boos ah ma ku laha Iswiidhan casri ah.

Xaafadaha magaalooyinka waaweyn duleedkooda oo amni ah. Marka kooxo dambiilayaal ahi la wareegaan wadooyinkeena iyo suuqyadeena markaasi nolosheena maalinle waxay noqotaa mid bilaa amaan ah. Waxaanu doonaynaa inaanu helno booliis dheeraad ah iyo waardiyayaasha amaanka, hawlo bulsho oo xilli hore ah iyo shaqo xawli ah oo lagaga hortago kooxaha iyo xag jirnimada dagaalka abuura.



SIYAASAD LIBRAALIYAD DHEERAAD AH

Haa ku aadan Yurub. Waa inaynu wada shaqayn samayno si loo dabari karo khatarta cimilada, dembiiliinimada caalamiga ah oo la qaato mas'uuliyada dadka soo qaxay. Waxaanu doonaynaa wada-shaqayn dheeraad ah oo Midowga Yurub ah iyo inaanu ka mid ahaano lacagta Yuurooda.

Ha la badbaadiyo adeega kalkaaliyanimada. Xaqa loo leeyahay kalkaaliye waxay dadka leh hoos u dhaca laxaadka ah siisaa fursada in loo noolaado sida dadka kale. Mararka qaarkood waa in xorriyadu kharash ku kacdaa.

Waa inay wax faa'iido leh noqotaa in wax la barto, xoog loo shaqeeyo oo la socodsiiyo shirkad. Waxaanu doonaynaa in hoos loo dhigo canshuuraha.

Xorriyada doorashada dhinaca barwaaqo sooranka. Ilaalinta tayada oo aad looga taxadaro sida lacagteena canshuurta ah loo isticmaalayo laakiin aan la baa'biin kala duwanaanshaha dadka.

Ha loo oggolaado dadka waayeelka ah inay keligood wax go'aamiyaan. Inay fududaato in qofkii doonayaa wakhti dheer sii shaqeeyo. Dheeraad wax laga sheego dhinaca daryeelka dadka waayeelka ah. Noocyo guri oo kala duwan oo dheeraad ah in la kala dooran karo.

DIGNIIN! Nuxur libraaliyad ah. Waxay karhi kara beer-laxowyaasha caadifada kiciya, xag-jirka iyo hanti-wadaaga. Xaqiiqda iyo bini'aadnimadu waxay si halis ah u dhaawici karaan cuqdada iyo beer-laxowsiga caadifada kiciya.

liberalerna.se / info@liberalerna.se / 020-53 53 53

Liberalerna